

**census**  
2021

# Qayb ka ahow Tirokoobka 2021

**Maalinta tirokoobku waa Axad 21 Maarso 2021. Waxaad heli doontaa bashqad martiqaad oo kuu sheegaysa sida aad ugu qayb qaadanayso.**

**In aad ka qayb qaadato dadka kalena ku dhiirigeliso in ay sidaas oo kale sameeyaan, waxaad gacan ka geysanaysaa hubinta in ay bulshadaadu hesho adeegyada ay u baahan yihiin.**

# Waa maxay tirokoobku?

Tirokoobku waa xog-ururin dhacda 10 sanno oo kasta oo sawir inaga siisa dhammaan dadka iyo qoysaska ku nool England iyo Wales.

Dawladda, Xildhibaanada golaha deegaanka, ururada samafal iyo ururo kale oo badan ayaa macluumaadka tirokoobka u isticmaala inay ku go'aamiyaan sida ay balaayiin gini sannad kasta ugu maalgeliyaan adeegyada. Tan waxaa ku jira ku maalgelinta gaadiidka dadweynaha, waxbarashada iyo daryeelka caafimaadka.

Si loo hubiyo in lacagtan lagu maalgeliyo halka loogu baahi badan yahay, waa muhiim in tirokoobku tiriyo qof walba.



## Gargaarkaagu macno ayuu samaynayaa

Waxaanu u baahanahay caawimadaada si aanu u gaadhno dadka ugu badan ee ka qayb qaata Tirokoobka 2021. Dadku waxay kuugu yimaadaan talobixin, gargaar iyo niyad-dejin.

Cidina uma taqaan bulshadaada si ka fiican sida aad adigu u taqaan. Gargaarka ka imanaya hoggaamiyeyaasha maxaliga ah iyo wakiilada bulshada ayaa lama huraan u ah ka caawinta lagu hubinayo in dadku ka qayb qaataan.

# Waxaa la heli karaa caawimo

Dadka ku nool guri kasta oo England iyo Wales ah waa in ay shari ahaan tirokoobka buuxiyaan, laakiin waxaa jiri doonta caawimo badan oo ay helayaan dadka u baahan. Tan waxaa ku jira hagitaan iyo gargaar luuqaddo badan iyo qaabab badan ah. Waxaa sidoo kale ku jira caawimo ah in tirokoobka internet ahaan loo buuxiyo.

Fadlan bulshadaada ka dhig mid ka warqabta caawimada aanu bixino, kuna dhiirigeli in ay ka qayb qaataan Tirokoobka 2021.

## Gargaarka xaafadda

Shaqaalahaayaga la shaqaynta bulshada maxalliga ah ayaa la heli karaa inta uu tirakoobku socdo oo dhan, iyadoo laga helayo xogo, talobixin iyo gargaar hawl qabasho oo qof kasta ka taageeraysa inuu ka qayb qaato. Waxay awoodi doonaan in ay kugu hagaan xagga aad ka helayso caawimada iyo gargaarka aad adiga iyo bulshadaadu u baahan tihiin.



# Kor u qaadidda ka warqabka

Fadlan naga caawi inaanu faafino warka ku saabsan waxa uu tirokoobku yahay iyo sababta uu qof walba macno ugu leeyahay. Waad na caawin kartaa adigoo dadka la wadaagaya macluumaadka waxa ay dadku u baahn yihiin inay sameeyaan, iyo sidoo kale xilliga iyo sida ay caawimo u hili karaan.

## Gaadhitaanka dadka

Shabakadahaaga xiriir waxay naga caawin karaan in aanu gaadhno dadka bulshadaada ee laga yaabo inay u baahan yihiin gargaar si ay uga qayb qaataan. Tani waxay hubin doontaa in qof walba lagu darey.

## Hel macluumaad dheeraad ah

Hel macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan ka wadashaqaynta u gargaaridda bulshadaada.



[www.census.gov.uk](http://www.census.gov.uk)



0800 587 2021



@Census2021